# **Analyz** F. O. B Test

**SOMALISKA**

## Falanqaynta shaybaarka F.O.B

## Uruurinta shaybaarka F.O.B



















* Dheecaanka tuubada waa in aan la cunin.

**1**

Xaanshida musqusha ku soo qaad inyar oo saxaaro ah, ama ururinta saaxarada awgeed xaanshida musqusha saar fadhiga musqusha.

**2**

Fureha BULUUGGA ka saar tuubada shay-baarka, kaddib ka soo saar qoriga shay-baarka ee yar. Dhinaca hoos ee cad waa in aan la taaban (waxaa loogu talagalay oo keliya shaqaalaha rugta shay-baarka)

**3**

Dabada fureha shay-baarka ee BULUUGGA dhowr meelood ka dhegeli saxaaradda.

**4**

Qoriga shay-baarka ka tirtir wixii saxaarad oo dheeraad ah, adigoo hab xasilan isticmaala xaanshida musqusha. Waa in saxaaradda la mariyaa halka godan oo keliya.

**5**

Qoriga shay-baarka ku celi tuubada kaddib si fiican u xir.

- Waxaa aad muhim u ah in shay-baarka aan layska qaadin iyadoo qofku u qabo caadada, baabasiir dhiigbax leh ama kaadidiisa dhiig leh.
- Tuubada ku calaamadeey magaca, tobbanka lambar ee aqoonsiga [personnummer] iyo taariikhda shay-baarka. Markaas kaddib shay-baarka waxaa lagu keydin karaa heer-kuleelka qolka. Shay-baarka waa in hawlgal laga qabtaa 15 maalmood gudahooda, tiriskaas oo laga soo bilaabo maalinta shay-baarka layska qaaday.

ANL PRODUKTER AB

VERSION 5 • JULI-2015